

KU: GUDDOOMIYAHA GOLAHA SHACABKA JFS

MUQDISHO

01/21/2015

Xoof. Gura
Haleo
MUQDISHO
01/21/2015

UJEEDDO: XOOJINTA QODOBBADII MADAXWEYNUHU KAGADHAWAAQAY XUSKII 21 JANAAYO, 2015

Annagoo ah xildhibaanada hoos ku saxiixan waxaan soo jeedinaynaa in golaha shacabka Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya si buuxda u xoojiyaan qodobbadii 6da ahaa ee Madaxweynaha Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya kaga dhawaaqay Xuskii 42guuradii ka soo wareegtay maalintii hirgalinta af Soomaaliga oo ku beegnayd 21 Janaayo, 2015.


Qodobbadaas oo kala ah:-

1. Laga bilaabo maanta oo ah 21 Janaayo in sannad walba maanta oo klale si heer qaran ah loo xuso maalinta qoraalka iyo dhaqangalinta Afka Soomaaliga
2. Laga bilaabo maanta oo ah 21 Janaayo 2015 in xafiisyada maamulka dawladda iyo xafiisyada hay'adaha kale ee dalka ku sugan looga shaqeeyo Afka Soomaaliga.
3. In la dardar galiyo dhammaystirka manhaj Mideysan oo ku qoran afka Soomaaliga lagana dhigo dugsiyada iyo goobaha kale ee waxbarashada.
4. In la dardar galiyo dib u hawlgalita Akaademiyaadii hiddaha, Fanka iyo Cilmibaarista ee Qaranka
5. In sida u gadhahsa habadan dib loogu dhiso xarumihii aqoonta iyo taariikhda iyo ilbaxnimada sida matxafyada iyo maktabadaha iyo kulliyadaha Jaamicadaha Qaranka.
6. In dib loo dhiso lana dhawro astaamihii taariikhda Ummadda Soomaaliyeed ee burburay

Waxaan Kaloo golaha ka codsaneynaa ,iyadoo la adkaynayo horumarinta afka hooyo, loona daneynayo aqoonyahannada Soomaaliyeed,si loogu abuurto shaqooyin ay hadda dalka gudihiisa ka hayaan shaqaale dibadda laga keensaday oo aan loo baahneyn,iney ansixiyaan in haydaha ka shaqeeya dalka gudihiisa ay luqadda xiriirka iyo wada shaqaynta lagu sameynayo ay noqoto Luqadda Afka Soomaaliga

Haddaba, waxaannu si xushmad iyo qaddarin leh uga codsanaynaa dhammaan xildhibaanada JFS inay n xoojiyaan Afka Soomaaliga ayna codkooda ku taageeraan inay Rasmi tahay.

1. Yusuf Mohamed Ali
2. Afweexid Abdullahi Jama
3. Samia J. Ali
4. Farisad Nur Guled
5. Abdalla Haji Ali Khmed
6. Hamadi Sadig Mohamed



7. X02. Mohamed Ahmed Kuran
8. X12. Abbasid Mohamed
9. X11. Mohamed Abdi Hayir
10. X11. Cherman Ysaali Celi
11.
12.
13.
14.
15.
16.
17.
18.
19.
20.